



## Magangelyo doonka: Waxaad heli doontaa qiyaastii xilli cusub, haddii ay maxkamadda racfaanku soo celisey codsigaagii in mar kale dib loo falanqeeyo

Waxaanu siinay codsiyadii magangelyo doonka ee ay maxkamadda racfaanku soo celisey qiyaastii xilliyo cusub oo lagu falanqeeyo. Waxaan ku falanqeyneynaa codsiyada noocaas ah si talaabo talaabo ah. Marka ugu horeysa waxaan ka sameyneynaa codsiyadaas go'aamo, kuwaas oo ah kuwa la sugayey muddo dheer.

### Hubi xilligga cusub ee qiyaastii lagu falanqeynayo codsigaaga

Haddii maxkamadda racfaanku ay soo celisey codsigaagii sanadihii 2018-2019 si mar kale loo falanqeeyo, waxaad go'aanka codsigaaga u heleysaa sidan soo socota:

- **2018:** ugu dambeyn bisha maarso 2021 dhamaadkeeda
- **2019:** ugu dambeyn bisha juun 2021 dhamaadkeeda
- **2020:** ugu dambeyn bisha sebtambar 2021 dhamaadkeeda

### Maxaad u heleysaa qiyaastii xilligga cusub?

Xafiiska laanta socdaalka wuxuu sameeyey shaqaale dhimis sanadkii 2019. Intaa waxaa dheer waxaanu ku khasbanaaney in aanu joojino wareysiyadii magangelyo doonka laga qaadayey korona feyraska awgii 13.3.-7.4.2020. Sababaas awgood maanan awoodin in aan sameyno dhammaan go'aanada oo dhan xilliyadii qiyaastii horey loo siiyey in lagu bixiyo go'aamada.

Waan fahansanahay, in go'aamadu ay saameyn weyn ku leeyihiin macaamiishayada noloshooda. Waanan ka xunnahay soo daahitaanka go'aamaddu dhibaatooyinka ay kugu yeelanayaan. Waaxanan si aad ah isugu taxalujineynaa inaanu hadda ku sameyno go'aamadda ugu dambeyn qiyaastii xilligga cusub ee hadda la qabtay.